



**Isbahaysiga Hagida Koonfur
Bari Marxaladda 2 Ka-qaybgal
Dheeraad ah**

**Warbixin ay soo saartay Shanice Clarke, Agaasimaha Ka-qaybgalka Bulshada
Isbahaysiga Hagida Koonfur Bari**

Jawaab-celinta hore: Luulyo – Ogosto 2021

Wadahadallo fulineed oo fool-ka-fool ah oo lala yeeshay 335 waalid/mas'uuliyiin ah kuwaas oo hadda ama dhawaanahanba leh carruur da'doodu tahay dugsiga dhexe oo deggan gudaha qaybta koonfur-bari ee Degmadda Portland Public School waxay naga caawisay fahanka bilowga ah.

ISIR/QOWMIYAD	WAREYSI DHAMEYSTIRAN
Aasiyaan	39
Madow	40
Laatiino	91
Badan/Aasiyaan/ Cadaan	24
Isir badan	28
Dhalad	3
Dadka Jasiiradaha Baasifiga	1
Cadaan	109



JAWAAB	AASIYAAН	MADOW	LAATIINO	BADAN/ AASIYAAН/CA DAAN	ISIR- BADAN	DHALAD	JASIIRADLAHA BAASIC	CADAAN	WADARTA
Tayada dugsiga iyo macalimiintood	35.9%	50.0%	53.8%	50.0%	39.3%	33.3%	0.0%	54.1%	49.6%
Barnaamijyo/n aadiyo/fursado diiradeed	25.6%	22.5%	17.6%	29.2%	17.9%	33.3%	0.0%	22.9%	21.8%
Kala duwanaanshah a jinsi iyo dhaqaale ee	7.7%	20.0%	6.6%	12.5%	14.3%	0.0%	0.0%	16.5%	12.5%
Badbaado/ Ammaan	15.4%	7.5%	14.3%	4.2%	21.4%	0.0%	100%	8.3%	11.6%
Tayada waxbarashado oda/ manhajkooda	15.4%	10.0%	11.0%	0.0%	14.3%	0.0%	0.0%	10.1%	10.4%
U dhawaanshah a	10.3%	7.5%	8.8%	8.3%	10.7%	0.0%	0.0%	10.1%	9.3%
Ma aqaan/Diiday	10.3%	10.0%	7.7%	0.0%	3.6%	66.7%	0.0%	5.5%	7.2%
Isla dugsiga ay dhigteen. Ma doonayo inay beddeshaan	10.3%	7.5%	8.8%	4.2%	3.6%	0.0%	0.0%	5.5%	6.9%
Aado isla dugsiga ay aadaan saaxiibadooda deriska ah	12.8%	5.0%	3.3%	8.3%	0.0%	0.0%	0.0%	7.3%	6.0%

Warbixinta Hore oo Buuxda: <https://drive.google.com/file/d/1qVT9idXnOChYH4tlMzQCaHI94dn9hB1z/view>



Fikradaha iyo Talooyinka: Sebteembar - Oktoobar 2021

Si kor loogu qaado ka-qaybgalka asalka ah, qaabka isku xidhka ku salaysan isirka ayaa taageeray maqalka fikradaha furan iyo waaya-aragnimada ardayda iyo qoysaska Koonfur-bari ee uu saameeyay nidaamka Marxaladda 2 illaa Sebtembar 2021.

Aqoonsiga saamaynta natijjooyinka suurtagalka ah, waxaanu ku dhiirigelinay qoysaska Lane, Creative Science, Harrison Park, Woodstock, iyo wixii ka dambeeya inay ka qaybqaataan kahor go'aan-qaadashada hore ee habka.

- Lane Middle School
 - Qoysaska madow
 - Qoysaska Aasiya
 - Qoysaska Latino/a/x
 - Shaqaalaha midabka leh
- Kulamada Guud
 - Qoysaska midabka hal mayl u jira Lane ama Harrison Park
 - Luqadda Isbaanishka
 - Luqadda Shiinaha
- Harrison Park
 - Qoysaska madow
 - Qoysaska Shiinaha
 - Latino/a/x
 - Qoysaska Ruushka
 - Qoysaska Soomaalida
 - Shaqaalaha midabka leh
- Creative Science School
 - Qoysaska midabka leh

Rajada iyo Hiigsiyada

- Dhisidda xalal maskaxeed oo waara halkii loo wajiji lahaa qaab "dhiig joojin" ahaan ah.
- Hadafka kordhinta kala duwanaanshaha dadka ee dugsiyada ay khusayso (ay ku jiraan heerka dugsiga hoose) waa inay si rasmi ah uga mid noqdaan koroka SEGC.
- Aqoonsiga xeeladaha si firfircooni loogu shaqaaleysiyo laguna haayo barayaasha , maamulayaasha, iyo shaqaalaha BIPOC ee dugsiyada PPS.
- Simidda qaybinta barnamijyada, oo ay ku jirto bixinta xulashooyinka da'da ku habboon ee ardayda fasalka dhexe
- Xarumaha K-8 iyo barnamijyada labada luuqadood ee lagu ballarinayo dugsiyada.
- Horumarinta dugsiyada dhaqanka ku salaysan ee siiya dareenka soo dhawaynta iyo lahaanshaha dhammaan ardayda iyo qoysaska, oo ay ku jiraan bulshooyinka soogalootiga ah.
- Maalgelinta hab-dhaqannada waxbaridda iyo waxbarshada waxtarka leh, sida barasho mashruuc-ku-salaysan, si loogu meeleyo dhammaan ardayda si guul leh ugu gudubka dugsiga sare.
- Taageeridda baahiyaha jireed, bulsheed iyo shucuureed ee dhammaan ardayda adiga oo siinaya agab si cadaalad ah loo qaybiyyat dhammaan dugsiyada si loo daboolo baahiyaha aasaasiga ah ee ardayda iyo in la hubiyo in arday kastaa yimaado isagoo diyaar u ah inuu wax barto.



Shakiga iyo Cabsida

- Ardayda/qoysaska BIPOC waxay dareemi liidid dhimis ama ka saarid.
- Culaysyo dheeraad ah ayaa la saari doona qoysaska markii horeba la takooray.
- Codadka dhaadheer ayaa ku hanjabi doona inay luudiyaan shaqada SEGC.

Mawduucyada Muhiimka ah ee Dhageysiga & Kulamada Barashada:

<https://www.pps.net/cms/lib/OR01913224/Centricity/Domain/265/21-1007%20SEGC%20Key%20L%20and%20L%20Themes.pdf>

Ficilka iyo La Xisaabtanka: Diseembar 2021

Goobaha gaarka ah iyo meelaha la beegsaday ee sii wada qaabka isirka ku salaysan ayaa la diyaariiyay si si toos ah talo uga soo gudbiyaan xaaladaha la soo jeediyay.

- Ardayda Madow, Asalkii hore & Midabka leh
- Luqadda- Isbaanishka
- Luqadda-Mandarin
- Dadyowga Madow, Asalkii hore & Midabka leh
- Kulanka Guud ee PAT
- Luqadda- Ruushka
- Luqadda-Soomaaliga
- Luqadda-Fitnaamiiska
- Luqadda-Kantoniiska

Kadib ka-qaybgalkan, Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari waxay u qaybsameen kooxo si ay dib ugu eegaan xogta cayriin oo ay u go'aamiyaan mawduucyada guud, maclumaadka cusub ee la helay, iyo cidda ka maqan kulanka Diisambar 16, 2021.

Mawduucyada Kooxda 1 (Clackamas)

- Sii wadida maqalka saamaynta carqaladaynta bulshooyinka dugsiga, gaar ahaan hadda
- Kellogg waxa uu la kulmay carqaladayn waxana uu ka walaacsan yahay isbeddel dheeri ah oo ku yimaada Isbaanishka DLI, bulshadu waxa ay dareemeen hoos u ghigid iyo in isbeddelku yahay ixtiraam darro.
- Dadku waxay u muujiyaan caabbinta isbeddelka si cad
- Ka labalabaynta qoysaska laga yaabo inay u guuraan dugsi waxqabad hoose leh
- Fikirada xoogga badan waa xoog badan yihiin, waxaana jira cagajiid in la sheego fikradaha aan la jeclayn



- Bulshooyinka waxa laga yaabaa inay la halgamaan is-waafajin la'aanta dhaqdhaqaqa barnaamijka, taasoo aad u saamaynaysa carruurta midabka leh iyo carruurta SES hoose

Mawduucyada Kooxda 2 (Columbia)

- Isku-dubbaridka dugsiga dhexe waa la soo dhaweynaya laakiin waxay xaddidaysaa gelitaanka barnaamijyada goobta awgeed
- Faham la'aanta ku saabsan gelitaanka gaadiidka, iyo sida ay u saameyn doonaan qaababka u gudbidda dugsiyada
- Creative Science wuxuu uga baahan yahay faahfaahin PPS hadda kadib
- Daireenka qolka ayaa u muuqday mid ah in badi dugsiyada hodanka ah laga ilaaliyo carqaladaynta, waxaana jira walaac ku saabsan "yaa aynan saameyn ku yeelan" habka
- Harrison Park waxa ay u muuqatay mid aad ugu hawlan Marxaladda 1, laakiin qoysaska xaafada ayaa laga dareemaya in laga maqlo u doodistooda ku aadan in ay wada joogaan.
- Codadka Lent iyo Harrison Park waxay u baahan yihiin mataalaad dheeraad ah Mawduucyada Kooxda 3 (Willamette)
- Maxaa loola jeedaa "sinaanta"?
- Jiritaanka niyad jab iyo kalsooni darro habsocodka, iyada oo guriga furan uu u muuqdo mid la isku hayo
- Wuxaan u baahanahay inaan maqlino fikirka qoysaska Lent iyo Harrison Park
- Bulshada Arleta waxay ku hawlan tahay sidii ay u wada joogi lahaayeen
- Bulshadu waxay doonaysaa inay fahmaan sababta dugsiyada Koonfur-bari ee gudaha aan loo maqlin
- Codadka Woodstock Chinese DLI waxay door bidaan barnaamijka ku wada yaala goobta
- Way adag tahay in la sameeyo xukunno iyada oo aan bulshadu aqoon u lahayn saamaynta dugsiga sare
- Farxadda ah in Bridger uu yeelan karo qaybo badan oo xaafadeed

Marxaladda 2 Ka-qaybgal Dheeraad ah: Dhamaadkii Janaayo 2022 ilaa hadda

Ka-qaybgalku waxa uu dhaliyay jawaab celin ka timid ku dhawaad 60 xubnood oo bulshada ah oo ku saabsan soo-jeedinno qabyo ah oo lagu dheellitirayo diiwaangelinta dugsiyada Koonfur Bari ee Portland, waxayna ku dhacday koox diireedyo, telefoonada, iyo fariimaha qoraalka ah. Wicitanada telefoonku wuxuu ku sii socdaa qoysaska horraanta Febraayo.

Luqadaha

Fursadaha ka-qaybgalka ayaa lagu bixiyay Fitnaamiis iyo Mandarin.

Dugsiyada

Ka-qaybgalayaal badan ayaa tilmaamay inay ku xidhan yihiin Harrison Park (22 ka qaygalayaasha) marka loo eego dugsi kasta, oo uu ku xigay Lent School (38), oo leh (9) buuxinta su'aal kasta oo ku saabsan soo jeedinta. Ka qayb qaadashada qoysaska gaarka ah ee Bridger ayaa socda.



Soo koobida Ka-qaybgalka Dheeraadka ah

Si loogu daro matalaad badan oo codad ah, gaar ahaan kuwa si aan loo qiyaasi karin u saameeyay isbeddelada la soo jeediyay, ka-qaybgal bulsho oo dheeraad ah ayaa lala sameeyay bulshooyinka dugsiyada la beegsaday. Diiradadu waxay ahayd talooyinka qoyska ee barnaamijka xaafadda, oo ay ku jiraan kuwa dhigta dugsiyada leh qaabka la wada deggan yahay.

Su'aasha 1: Sideed u qeexdaa guusha? Maxay yihiiin caqabadaha hortaagan guusha? Sidee buu dugsigu qayb uga yahay taas?

Lent, Harrison Park

- Maamulayaasha khibradda leh ee dejiya natijjooyinka waxbarasho ee uu dejiyey dugsigu waxay caawiyaan ilmahayga hab-dhaqankiisa
- Luuqudu waxay caqabad ku tahay guusha dugsiga. Waalidiintu wali waxay uga baahan yihiiin taageero badan dugsiga
- Saaxiibada iyo macallimiintu waxay saameyn weyn ku leeyihiiin carruurta. Qoyska iyo carruurta waxay u baahan yihiiin taxadar shaqaalahaa.
- Helitaanka nashaadaadka dugsiga kadib sida naadiga chess-ka iyo nashaadaadka bulshada waxay caawiyaan gaaridda guusha
- Walaaca ku saabsan carruurta kala duwan ee taga Kellogg iyaga oo aan

helin taageerada ay u baahan yihiiin Bridger, Marysville

- Manhajka sayniska, akhriska, iyo farshaxanka
- Nidaam taageero oo xooggan iyo dhiirigelinta bulsheed ee ardayda
- Taageerada xooggan ee Bridger ku noqonaya Creative Science School
- Macalimiinta iyo maamulaha Marysville ee daryeelaya arday kasta waa la aqoonsan yahay

Jawaab-celin ku saabsan Saamaynta DLI oo Dhacdooyin ah

- Qaabka dugsiga oo dhan waa caadi haddii la ilaaliyo kala duwanaanshaha ardayda moodooyinka ku wada yaal
- "Waxay noqon lahayd wax cajiib ah" (in la haysto DLI dugsi oo dhan ee Lent)
- Taageerada xooggan ee dugsiga DLI ee dhan ee Lent
- Khilaafyada qaar ee qaabka dugsiga oo dhan oo ka yimid qoysaska xaafadda Lent
- Tiro badan oo waalidiin ah ayaa muujinaya doorbidida barnaamijyada DLI inuu ku sii ahaado Harrison Park
- Qoysaska Xaafadda ayaa laga dareemayaa Harrison Park, waxayna qiimeeyaan xulashooyin badan
- Saadaasha isdiiwaangelintu ma tixgelinayso dhismaha cusub & guryaha furan ee sugaya in la gato ama laga kireeyo xaafadda - waxa ay u muuqataa in saadaasha laga yaabo in ay tahay mid gaabinayso gaar ahaan marka xarumaha HP la soo cusbooneysiyo.
- Doorbida in hal barnaamij oo DLI ah loo yeelo Harrison Park si aanu dugsigu cariiri u noqon maamulayaashuna ay xidhiidho adag ula dhistaan ardayda
- Labaduba taageero weyn ee dugsiga oo dhan Isbaanish DLI, iyo ka hor imaad qoysaska kale ee xulashadan ah



Guudmarka Sahanka Bulsheed ee Marxaladda 2 ee Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari

Warbixin ay soo saartay Waaxdayada Cilmi-baarista, Qiimaynta iyo La Xisaabtanka

Qoraalkani waxa uu soo koobaya 408 jawaabood oo ku saabsan Sahanka Bulshada Marxaladda 2 ee Isbahaysiga Hagidda Koonfur Bari. Sahanku wuxuu soo saaray jawaab celin ka timid 408 xubnood oo bulshada ah oo ku saabsan qabyo-qoraalyo soojeedinno lagu dheellitirayo diiwaangelinta dugsiyada Koonfur-bari Portland.

Luqadaha

Sahankan waxa lagu turjumay dhammaan shanta luuqadood ee ay taageerto PPS (Soomaaliga, Isbaanish, Ruushka, Fiitnaamiiska, iyo Shiinaha). Waxaa jiray 408 jawaabood oo sahanka luuqada Ingiriisiga ah, laba jawaabood oo laga bixiyay sahanka luuqadda Shiinaha, hal jawaab oo Soomaali ah, iyo eber jawaabaha sahanka Isbaanishka, Ruushka, ama Fiyatnaamiis. Saddexda qof ee ka jawaabay sahannada luqadaha aan Ingiriisiga ahayn ma dhammaystirin ra'yi ururin ka baxsan shayga koowaad ama soo gudbin wax faallooyin ah oo ku saabsan soo jeedinta.

Aqoonsiga Isirka iyo Qowmiyadda

Ka qaybgalayaasha sahanka ayaa la waydiiyay inay sheegaan isirkooda iyo qowmiyadooda ka hor inta aysan soo gudbin faallooyinka ku saabsan soo jeedinta (Shaxda 1).

Tiro aan dheeli tirnayn oo caddaan ah, xubnaha bulshada Hisbaanigga aan ahayn ayaa ka jawaabay sahanka Marxaladda 2: in ka badan 83% ka qaybgalayaashu waxay ku jawaabeen inay isu aqoonsan yihiin caddaan marka la barbar dhigo inay yihiin in ka yar 56% ardayda degmada (Shaxda 1). Ku dhawaad waxay yihiin 17% ardayda PPS balse wax ka hooseeya 5% ka qaybqaatayaasha sahanka waxay isu aqoonsadaan inay yihiin Hisbaanik – Laatiinka/x/a/o. Ma jiro ka qaybgalayaal isu aqoonsaday inay yihiin Afrikaan Ameerikaan ah ama Dhalad Hawaiian ah ama Jasiiradaha kale ee Baasifigga.

Shaxda 1: Isirka/Qowmiyadda ka qaybgalaha

Isir/Qowmiyad	Ka-qaybgalayaasha Sahanka		Ardayda PPS %
	n	%	
Aasiyaan	17	4.2	6.0
Isbaanish - Laatiin/x/a/o	19	4.7	16.7
Dhaladka Maraykanka ama Dhaladka Alaska	4	1.0	0.5
Jinsiyado-Badne	16	3.9	11.8
Cadaan, aan ahayn Isbaanish ahayn - Laatiin/x/a/o	340	83.3	55.8
Mid kale	12	2.9	NA
Guud ahaan	408	100.0	100.0

Ogsoonow. Ma jiro ka qaybgalayaal isu aqoonsaday inay yihiin Afrikaan Ameerikaan ah ama Dhalad Hawaiian ah ama Jasiiradaha kale ee Baasifigga.



Dugsiyada

Ka-qaybgalayaal badan ayaa muujiyay inay xidhiidh la leeyihiiin Woodstock Elementary School (82 jawaabo) marka loo eego dugsi kasta, waxaa ku xigaan Creative Science School (78), Atkinson (52), iyo Arleta (47). Ka qaybgalayaasha qaarkood lama lahayn xidhiidh dugsiyada ay khusayso soo jeedintu, oo uu ku jiro mid ka mid ah ka qaybqaataha oo tilmaamay in ay guriga wax ku baraan ardaygooda (Lifaaqa A).

Qaar ka mid ah ka qaybgalayaasha sahanku waxay muujiyeen in ay xidhiidh la leeyihiiin dugsiyada laba luuqad wax ku barashada (DLI):

- Woodstock Mandarin Immersion: 18 ka qaybgalayaal;
- Atkinson Spanish Immersion: siddeed kaqeybgaleyaal;
- Bridger Spanish Immersion: shan kaqeybgaleyaal; iyo
- Lent Spanish Immersion: laba kaqeybgale.

Ka falcelinta soo jeedinta

Sahanku wuxuu waydiiyay ka qaybgalayaasha, "Yaa ka faa'iidaysan kara ama uu culays ku noqon karaa isbeddellada la soo jeediyay? Fadlan ku tixgeli bulshada kale ee dugsiga iyo sidoo kale dugsigaaga jawaabtaada."

Mawduucyada soo socda ayaa ka soo baxay jawaabaha ka qaybgalayaasha ee su'aashan.

- Isku darka barnaamijyada DLI waxay gacan ka geysan kartaa dhisidda bulshada dhexdeeda dadka ka kala yimid dhaqamo kala duwan¹
- Creative Sciences School ayaa ka faa'iidaysan doona meel cusub, laakiin ka qaybgalayaasha qaarkood waxay dareemeen culayska saaran ardayda dugsiyada kale inuu aad u weyn yahay
- Walaaca guud ee ku saabsan sida isbeddel kastaa uu culaysyo ugu leeyahay kooxaha taariikh ahaan aan loo adeegin (ardayda midabka, ardayda waxbarashada gaarka ah, Bartayaasha Luuqadda Ingiriisiga, ardayda ay haysato cunto yari)²
- Welwelka guud ee ku saabsan sida isbeddel kasta oo ka dhaca inta lagu jiro aafada uu culayska ugu darayo ardayda, macallimiinta, iyo qoysaska³
- Walaaca ku saabsan ka wareejinta barnaamijka Woodstock xaafad ay ku nool yihii dad badan oo ku hadla Mandarin, oo ku saabsan gaadiidka ardayda Mandarin DLI
- Walaaca ku saabsan sida isbeddelka laba luuqad ku barashada Isbaanishka u saameeya bulshada Latinx⁴
- Walaaca ku saabsan sida ardayda barnaamijyada xaafadda ay u saameeyaan⁵

¹ "Isku-meelaynta barnaamijka DLI wuxuu faa'iido u yeelan doonaa bulshada xaafadda iyo bulshada ku hadasha afka Mandarin ee u dhalatey maadaama ay isu keento kooxo ka soo jeeda asal dhaqameed kala duwan." (xubinta bulshada Aasiya Woodstock DLI)

² "Shakhsiyadka ay sidaaadka ah u saameeyeen barnaamijyadani waxay noqon doonaan soo-galootiga, qoysaska Latinx ee ka barakacaya dugsigii ay doorteen inay dhigtaan, haddii ay taasi tahay sababo u dhow guryahooada ama shaqada." (xubin ka tirsan beesha Latinx Atkinson)

³ "Carqaladeyn ta dugsigan waxay sugi kartaa ilaa inta COVID laga xakameynayo oo dadku ay madaxa ka kor saarayaan biyaha." (Xubinta bulshada ee Creative Sciences School ee Latinx)

⁴ "Beesheenna Latino waxaa laga yaabaa inay culeys ku saarto isbeddelkan iyadoo loo kala saarayo laba luuqad ku barshada Isbaanishka si gaar ah." (xubin ka tirsan beesha cadaanka Lent)

⁵ "Dugsiyada xaafadda iyo bulshooyinkooda waa la carqaladeynaya si ay uga faa'iidaystaan xulashooyinka ardayda iyo bulshadooda." (xubin ka tirsan beesha Latinx Atkinson)



- Walaac ku saabsan carqaladaynta xaafadaha⁶

Gunaanadka iyo Talaabooyinka Xiga

Ma jiro wax la isku raacsan yahay oo ka soo baxay jawaabaha sahanka Marxalada 2, sida xubin ka mid ah bulshada uu sheegay: "Culaysku waa saamaynta ay la kulmi karaan carruurta la rarayo. Faa'iidada waxay u tahay kuwa hela dugsiyadii ay hore u joogeen." (xubinta bulshada Latinx DLI Woodstock)

Ka-qaybgalayaal badan ayaa faallo ka bixiyay inay ka walaacsan yihii matalaadda loo siman yahay inta lagu jiro geeddi-socodka qorshaynta.^{7,8,9} Iyada oo laga jawaabayoo walaacyadaas, PPS waxay samaysay wacyi-gelin bulsho oo dheeraad ah iyada oo loo marayo kooxaha diiradda oo si ula kac ah loo qaabeeyey iyo fadhiyo maclummaad oo loogu talagalay xubnaha bulshada ee ay saameeyeen isbeddellada la soo jeediyay.

Soo koobida Ka-qaybgalka Dheeraadka ah

Si loogu daro matalaad badan oo codad ah, gaar ahaan kuwa si aan loo qiyaasi karin u saameeyay isbeddelada la soo jeediyay, ka-qaybgal bulsho oo dheeraad ah ayaa lala sameeyay bulshooyinka dugsiyada la beegsaday. Diiradadu waxay ahayd taloooyinka qoyska ee barnaamijka xaafadda, oo ay ku jiraan kuwa dhigta dugsiyada leh qaabka la wada deggan yahay.

Ka-qaybgalkani wuu socdaa - laakiin cusboonaysiintani waxay soo koobaysaa jawaabaha laga bilaabo Janaayo 27-keeda ilaa Febraayo 3deeda. Ka-qaybgalku waxa uu dhaliyay jawaab celin ka timid ku dhawaad 60 xubnood oo bulshada ah oo ku saabsan soo-jeedinno qabyo ah oo lagu dheellitirayo diiwaangelinta dugsiyada Koonfur Bari ee Portland, waxayna ku dhacday koox diireedyo, telefoonnda, iyo fariimaha qoraalka ah. Fursadaha ka-qaybgalka ayaa lagu bixiyay Fitnaamiis iyo Mandarin.

Ka-qaybgalayaal badan ayaa tilmaamay inay ku xidhan yihii Harrison Park (22 ka qaybgalayaasha) marka loo eego dugsi kasta, oo uu ku xigay Lent School (38), oo leh (9) buuxinta su'aal kasta oo ku saabsan soo jeedinta.

Ka qayb qaadashada qoysaska gaarka ah ee Bridger ayaa socda.

⁶ "Dhammaanteen waxaa laga yaabaa inay saameyn nagu yeelato. Waxaan dhisnay bulsho aan qiimeeyno oo aynaan rabin in la burburiyo. Dugsigu wuxuu ka soo horjeedaa gurigayaga. Waxaan jecelnahay in ilmaheenna uu dugsiga la dhigto deriskeenna. Ma rabno inaan gaadiid sarno ubadkeena. Waxaan jecelnahay kala duwanaanshaha. Waxaan ka soo horjeednaa isbeddellada la soo jeediyay. Haddii isbeddel dhaco waa in sannadba sannadka ka dambeeyaa loo sameeyo halkii mar la wada samayn lahaa." (xubin ka tirsan beesha cadaanka Lent)

⁷ "Waxaan isku dayayaa inaan qeexo cidda matalaysa ardayda asaliga ah/Dhaladka Maraykanka ah iyo qoysaska soo jeedintan. Run ahaantii waxaan gabi ahaanba ku wareeray wixa dhacaya iyo sababta. Ma ahan PPS-keygii ugu horreeyay ee la xira dugsigaaga, laakiin xaqiiodii waa tii ugu horreysay oo aan miiska layga matalin." (ubinta bulshada ee Dhalad Maraykan ah/Dhalad Alaska ee Creative Sciences School)

⁸ "Waa inaan si taxadar leh uga fiirsada sida isbeddelladanii u saameyn doonaan oo ay u arki doonaan bulshooyinka midabka leh ee Portland. Yoolalka la sheegay ee SEGC waxa ka mid ah luuqad aad u wanaagsan oo ku saabsan ka mid noqoshada iyo sinnaanta, laakiin luuqaddaa wax ba m aha haddii nidaamka, soo jeedinta, iyo natijjooyinka aanay taageerin bulshooyinkaas. Si kale loo dhaho, PPS iyo SEGC waxay yeelan karaan sababo ay ku sameeyaan isbedelo ay aaminsan yihii inay faal'iido u yeelan doonaan bulshooyinka midabka leh, laakiin haddii bulshooyinka ay dhibaatadu saameysey aysan ku raacsanayn ama ogaanin sababahaas, markaa ku qasbida isbeddeladaas waxay waxyeelo u geysataa beelahaas oo waxay samaysaa ujeedooyinkaaga. iyo sababo aan macno lahayn oo aan la aamini karin." (Xubinta bulshada DLI ee Isbaanishka White Atkinson)

⁹ "Sugsiga tag oo la hadal waalidka. Aad xaafadaha kala duwan ee caawinta waligood helin oo ogow waxa qoysasku u baahan yihii si ay ardaydoodu u bartaan oo ay u guulaystaan. Aad baanu ugu dhiboonaynaa bulshadan. Wacyigii beryahan danbe ee mudaaharaadku keenay waa kaliya bilow, wixa loo baahan yahay in qoysaska oo dhan la gaaro oo wixii ay u baahan yihii la gaadhsiiyo!" (Isir kala duwanaan Woodmere, Lane, xubin bulshada Franklin ah)



Su'aasha 1: Sideed u qeexdaa guusha? Maxay yihiin caqabadaha hortaagan guusha? Sidee buu dugsigu qayb uga yahay taas? (Tani waxay inta badan matalysaa jawaab-celinta qoysaska Lent-- sida kalfadhiyada Harrison Park uu hogaaminayay maamulaha, kaasoo xiriir la leh qoysaska.)

- Maamulayaasha khibradda leh ee dejiya natijjooyinka waxbarasho ee uu dejiyey dugsigu waxay caawiyaan ilmahayga hab-dhaqankiisa
- Luuqadu waxay caqabad ku tahay guusha dugsiga. Waalidiintu wali waxay uga baahan yihiin taageero badan dugsiga
- Saaxiibada iyo macallimiintu waxay saameyn weyn ku leeyihii carruurta. Qoyska iyo carruurta waxay u baahan yihiin taxadar shaqaalahaa.
- Helitaanka nashaadaadka dugsiga kadib sida naadiga chess-ka iyo nashaadaadka bulshada waxay caawiyaan gaaridda guusha
- Walaaca ku saabsan carruurta kala duwan ee taga Kellogg iyaga oo aan helin taageerada ay u baahan yihiin

Jawaab-celin ku saabsan Saamaynta DLI oo Dhacdooyin ah

Lent

- Qaabka dugsiga oo dhan waa caadi haddii la ilaaliyo kala duwanaanshaha ardayda moodooyinka ku wada yaal
- "Waxay noqon lahayd wax cajiib ah" (in la haysto DLI dugsi oo dhan ee Lent)
- Taageerada xooggan ee dugsiga DLI ee dhan ee Lent
- Khilaafyada qaar ee qaabka dugsiga oo dhan oo ka yimid qoysaska xaafadda

Harrison Park

- Tiro badan oo waalidiin ah ayaa muujinaya doorbiddida barnaamijyada DLI inuu ku sii ahaado Harrison Park
- Qoysaska Xaafadda ayaa laga dareemayaa Harrison Park, waxayna qiimeeyaan xulashooyin badan
- Saadaasha isdiiwaangelintu ma tixgelinayso dhismaha cusub & guryaha furan ee sugaya in la gato ama laga kireeyo xaafadda - waxa ay u muuqataa in saadaasha laga yaabo in ay tahay mid gaabinayso gaar ahaan marka xarumaha HP la soo cusbooneysiyo.
- Doorbida in hal barnaamij oo DLI ah loo yeelo Harrison Park si aanu dugsigu cariiri u noqon maamulayaashuna ay xidhiidho adag ula dhistaan ardayda

*Lifaaqa A:A: Dugsiyada*

Dugsiga	Tirada jawaabaha
Woodstock	82
Creative Science School	78
Atkinson	52
Arleta	47
Bridger	30
Lewis	25
Marysville	22
Mt Tabor	21
Sellwood MS	17
Kellogg	15
Hosford	13
Franklin	11
Glencoe	6
Lent	5
Richmond	4
Cleveland	3
Creston	3
Harrison Park	3
Alameda	1
Beaumont	1
Buckman	1
Grant	1
Grout	1
Lane	1
Vestal	1
Woodmere	1
Wax kale (tusaale ahaan, dugsi-guri, xannaano soo galeysa 2022-23, iwm.)	3

Ogsoonow: Ka qaygalayaasha sahamintu waxay muujin karaan in ka badan hal dugsi, ka qaygalayaashu ma sheegin inay ku xidhan yihiin in ka badan saddex dugsi.